

Ka-dhaafida Shuruudaha Medicaid ee 1115 ee Barnaamijka Oregon 2022-2027: Dhabbaha Xaqsoorka Caafimaadka

Gobolka Oregon wuxuu fursad u haystaa inuu adeegsado barnaamijkiisa soo socda ee 2022-2027 Ka-dhaafida Shuruudaha Medicaid ee 1115 oo ah dhabbo lagu abuurayo xaqsoor badan oo daryeelka caafimaadka ah. OHA waxay ka heshay fikrado dhammaan daafaha gobolka – dadka haya xilalka awoodeed ilaa dadka lagu takooray cunsuriyadda iyo dulmiga nidaamsan – oo codsanaya OHA inay adeegsato codsigan ka-dhaafida shuruudaha si ay u raadiso nidaamka daryeelka caafimaadka oo xaqsoor badan leh. Sidaas darteed, OHA waxay soojeedinaysaa afar siyaasadood oo muhiim ah kuwaasoo aan aaminsanahay inaan ku abuuri karno nidaamyo awoodeed iyo caafimaad oo cusub, oo aan dib u celin karno magac-xumada xaqsoorka caafimaadka. Su'aalahaayaga cilmi-baaris iyo soojeedinada siyaasadeed ee iyaga ka dhasha waxay ku jiraan afar sookoobis cilmi-baaris oo siyaasadeed.

Hadafka guud ee ka-dhaafida waa in la hormariyo xaqsoorka caafimaadka iyadoo la:

Hubinayo helitaanka caymis ee dhammaan dadka jooga Oregon



Abuurayo nidaam caafimaad oo xaqsoor salka ku haya



Dhiirigelinayo kharash gareynta casriga ah, ee dabacsan



Dib loogu maalgelinayo keydadka lacageed ee dawladda nidaamyada oo dhan



Haddii uusan jirin **helitaan caymis oo loo siman yahay**, dadku ma heli karaan caafimaad ama daryeelka ay u baahan yihiin—runtan waxaa dardar geliyay mahadhooyinkii lala kulmay inta lagu guda jiray COVID-19. Waan ognahay in dadka midabka leh iyo bulshooyinka taariikh ahaan la dulmiyo ay leeyihiin heerar sare oo caymis la'aan ah. Codsigeena ka-dhaafida shuruudaha wuxuu raadin doonaa inuu dib ugu saxo helitaanka xaqsoor la'aanta ah xeelado lagu fidinayo caymiska ilmo iyo qofka kasta oo weyn ee jooga Oregon ee aan caymis siin karno, oo aan u dejin karno caymiska xubnaha. [Akhri wax dheeraad ah](#)

Xitaa markay dadku caymis leeyihiin, mahadhadooda nidaamka daryeelka caafimaadka aad ayay u kala duwan yihiin iyadoo ku saleysan jinsiyadooda, qowmiyadooda, jinsigooda, nooca jinsiga, nooca galmada, iyo dhammaan arrimaha kale ee bulsheed ee ay ka kooban tahay cidda ay yihiin. Anaga oo diirada saareyno siyaasadaha wax ka beddelaya xaqiiqadan isla markaana hubinaya in nidaamkeena daryeelka caafimaad uu siinayo shaqsi kasta mahadho xaqsoor leh oo qofka ku saleysan, waxaan bilaabi karnaa inaan abuurno **nidaamka daryeelka caafimaadka ee ku saleysan xaqsoorka**. Tani waxay u baahan tahay isuduwid iyo wadashaqeyn lala yeesho nidaamyada ka baxsan daryeelka caafimaadka. [Akhri wax dheeraad ah](#)

Nidaamkeenu wuxuu wax badan ayuu ka qaban karaa dhiirrigelinta wadahalgalayaasheena si ay u maalgeliyaan hababka ku saleysan bulshada si wax looga qabto arrimaha caafimaadka bulshada ee dhaqaajinaya xaqsoor la'aanta caafimaadka. Waxaan dooneynaa inaan helno **dabacsanaan dheeraad ah oo xagga kharash gareynta** lagu sameynayo waxyaabaha kor u dhaqaajiyo caafimaadka iyadoo la abuurayo rajo ah in kharash gareynta ay ku sameyso horumar macno leh caafimaadka shaqsiga. Tani waxaa sidoo kale ku jiri doona in dib loo qeybiyo lacagaha iyo awoodda go'aan qaadashada ee ku gaadaaman maalgashiga bulshada isla bulshada lafteeda. [Akhri wax dheeraad ah](#)

Gobolka Oregon wuxuu ka abuuray keydad lacageed oo fara badan habka uu u maray Medicaid marka la barbardhigo hababka gobolada kale. Nooca CCO-ga aan adeegsano waa mid hal-abuur leh oo kharashiisu wax-ku-ool yahay. Halkii aan ka oggolaan lahayn inay kaydadaas lacageed ku dhacaan qasanada dawladda federaalka iyo gobolka, waxaan doonaynaa inaan codsano inaan **dib ugu maalgalino keydadka lacageed ee dawladda bulshada** si wax looga qabto dhibaatooyinka waaweyn ama dhiaatooyinka ka jira gobolka oo dhan oo aysan hal bulsho keliya wax ka qaban karin. Iyadoo diirada la saarayo xaqsoorka, waxaan aaminsanahay inaan u adeegsan karno maalgalintan wax ka qabashada caqabadaha waaweyn ee ku gaadaaman caafimaadka iyo xaqsoorka caafimaadka. [Akhri wax dheeraad ah](#)

Jawaab-celinta

OHA waxay ku saleysay fikradahaan siyaasadeed jawaab-celinta ballaaran ee dadweynaha ee dhowrkii sanno ee la soo dhaafay. Waxaan ku tiirsan nahay daneeyayaasha iyo dadweynahasi aan wax uga qabano siyaasadaha aan soojeedino si aan u sii wadno inaan u horumarino nidaamka Medicaid ee gobolkeena innagoo adeegsanayno qaabab lagu wanaajinayo caafimaadka iyo noloshada dadka Oregon. Waxaan soo dhaweyneynaa jawaab-celinta ku wajahan siyaasadda kor lagu soo sheegay iyo sookoobista cilmi-baarista. Waad nala soo xiriiri kartaa wakhti kasta si aan noola wadaagto fikradaada adoo adeegsanaya iimaylka 115WaiverRenewal@dhsosha.state.or.us ama adoo ka qaybgalaya kulan dadweyne si aan u bixiso faallooyin. Jadwalka kulamada dadweynaha ayaa laga heli karaa bogga mareegtayada Oregon.gov/115WaiverRenewal.

Waxaad ku heli kartaa dukumintigaan luuqado kale, daabacaad weyn, qoraalka indhoolayaasha ama qaabka aad jeceshahay. Kala xiriir Barnaamijka Iska Kaashiga Wacyigelinta Bulshada community.outreach@dhsosha.state.or.us ama adoo wacaya 1-833-647-3678. Waxaan aqbalnaa dhammaan wicitaanada dadka hadalka dhibayo ama waxaad wici kartaa 711.